



Diiradda la saarayo: In lagu helo daryeel tayadiisa sareyso

Waxaanu rabnaa in aanu xaqiijino in aad helayso daryeelka u wanaagsan ee suurtagalka ah. Waxaan taasi u sameynaa, qayb ahaan, anaga oo daryeel bixiyayaasha lacagta u siina buuxinta hadafyada la xiriira caafimaadkaaga — waxay ku saabsan tahay daryeelka wanaagsan, shakhsi ahaaneed. Tani waxaa mararka qaarkood loogu yeeraa lacag bixinta ku saleysan qiimaha ama lacag bixinta beddelka ah.

Habka caadiga ahaa

Lacag uu siinta daryeel bixiyayaasha ee adeeg kasta oo ay bixiyaan.



Hab cusub

Lacag u siinta daryeel bixiyayaasha oo ku saleysan tayada daryeelka ay bixiyaan ka caawinta bukaanada in ay si wanaagsan u maareeyaan caafimaadkooda.



Waxaan lacag u siinaa daryeel bixiyayaasha iyo xarumaha caafimaadka iyada oo lagu saleynayo sida ay u buuxiyaan tallaabooyinka qaarkood:



Helitaanka: Xarunta caafimaadku waxay aragtaa dhammaan xubnaheeda kaliya ma ahan qaar kaliya. Daryeel bixiyayaashu waxay xaqiijiyaa in xubnuhu ay helaan baaritaano joogto ah.



Tayada: Xarunta caafimaadka waxay xubnaha ka caawisaa in ay sugnaadaan caafimaad. Carruurta waxay helaan tallaalo. Dadka waaweyni waxay helaan baaritaano caafimaad.



Luqadda: Xarunta caafimaadku waxay bixisaa adeegyada luqadda iyo turjumaada oo loogu talagalay xubnaha doorbidaya luqad aan ka ahayn Ingiriisi.



Caafimaadka afka: Daryeel bixiyayaashu waxay caafimaadka ilkaha kala hadlaan xubnaha. Waxay xubnaha ka caawiyaan in ay helaan dhakhtarka ilkaha, haddii loo baahdo.



Caafimaadka dhimirka: Xarunta caafimaadku waxay bixisaa adeegyada caafimaadka dhimirka oo uu weheliyo daryeelka caafimaadka jirka.



Kharashka: Daryeel bixiyayaasha iyo xarumaha caafimaadku waxay gacan ka geystaan hoos u dhigida kharashka iyaga oo xaqiijinaya in ay xubnuhu helaan oo ku sugnaadaan caafimaad.

Wax ka ogow CareOregon

Adeegyada luqadda waxaa bixiya CareOregon, qorshahaaga caafimaadka Medicaid. Halkan ka ogow waxyaabo badan oo nagu saabsan.

Marka ay dadku ka hadlaan Medicaid ka jirta Oregon, waxaa dhici karta in aad maqasho iyaga oo dhahaya magacyo iyo warqado badan oo kala duwan. Sababtu waa in ay jiraan ururo badan oo ku lug leh xaqijinta in aad hesho daryeelka aad u qalanto. Sidee baad macne ugu yeeli kartaa haba yaraatee?

Waxay gacan ka geysataa in aad uga fikirto Medicaid ka jirta Oregon in ay tahay sida qaabka pyramid oo kale.

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa gacanta ku haya barnaamijka Medicaid ee loogu talagalay gobolka Oregon oo dhan, kaasi oo loogu yeero Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP).

Health Share of Oregon (HSO) waa waxa loo yaqaano daryeelka urruradu iska kaashadeen (CCO). Health Share of Oregon waxay ka hoos shaqeysaa OHA si ay ugu adeegto xubnaha ka tirsan OHP ee ku nool degaanka saddexda-magaalo ka kooban.

CareOregon waa mid ka mid ah dhowr bixiyayaasha caafimaadka oo ku yaala degaanka saddexda-magaalo ka kooban oo Health Share CCO ka caawiya n ay bixiso daryeel. Waxaanu sidoo kale lacag bixinta ku saleysan qiimaha siinaa daryeel bixiyayaasha iyo xarumaha caafimaadka si ay uga caawiso xaqijinta in ay xubnuhu helaan daryeel wanaagsan.

Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP) wuxuu noqon karaa dhakhtar, kalkaaliso sare, kalkaaliyaha dhakhtarta ama daaweynta bedelka ah 'naturopath'. Waxay isku duwaan daryeelkaaga aad la leedahay CareOregon iyo xubnaha kale ee kooxda caafimaadka sida dhakhaatiirta ilkaha, bixiyayaasha daryeelka caafimaadka maskaxda, farmashiyayaasha iyo kuwo kale.

CareOregon waxay bixisaa adeegyada kuwan oo kale ah ee loogu talagalay xubnaha Medicaid (OHP):

- ▶ Daryeelka caafimaadka jirka
- ▶ Daryeelka caafimaadka dhimirka
- ▶ Isticmaalka mukhaadaraadka
- ▶ Daryeelka ilkaha
- ▶ Medicare la sii marayo CareOregon Advantage
- ▶ Daryeelka bukaanka hospice ama daaweynta oo la adeegsanayo Bixiyayaasha Housecall

Waxaad sidoo kale awoodi doontaa in aad isticmaasho adeegyo muhiim ah sida kuwani oo kale:

- ▶ Isku duwida daryeelka
- ▶ Farmashiyaha
- ▶ Daryeelka dhalashada ilmaha ka hor iyo daryeelka dhallaanka
- ▶ Kala doorashada gaadiidka
- ▶ Adeegyada turjumaada luqadda
- ▶ ER iyo daryeelka degdega ah

careoregon.org

Su'aalaha?

Ma haysaa su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan CareOregon iyo Medicaid? Ama waxaa laga yaabaa in aad jeclaan lahayd in aad noqon xubin ka tirsan CareOregon? La hadal qof kasta oo ka tirsan kooxdeena Connect to Care ama wac Adeegeena Macmiilka ee waxtarka iyo saaxiibtinimada leh ka wac 800-224-4840 ama TTY 711.

Waxaad heli kartaa tani oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Taageeradani waa lacag la'aan. Wac 800-224-4840 ama TTY 711. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta. Waxaad caawimaad ka heli kartaa turjubaanka daryeelka caafimaadka oo xirfad leh isla markaana la aqoonsan yahay.



CareOregon